Sharciga Caawinta Qoyska:

Waajibaadkaaga iyo xuquuqahaaga

SOMALI

Nofeembar 2018

Australian Government
Department of Education and Training

NSW FAMILY DAY CARE ASSOCIATION INC.

SQALABKA MACALINKA MAALINTA DARYEELKA QOYSKA:
Waajibaadkaaga iyo xuquuqahaaga

Dowlada Oostareeliya waxaa ay oggolaanaysaa bixiyayaasha daryeelka ilmaha iyo adeegyada waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska. Daryeel bixiyaha la oggolaaday ayaa qaadanaya oggolaanshaha si uu ugu shaqeeyo hal adeeg ama in ka badan.

Macalin ahaan, waxaad ka qaybgalaysaa Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska – daryeelka aad bixiso waxaa aad ku matalaysaa adeegaas. Dowlada Oostareeliya waxaa ay oggolaanaysaa bixiyayaasha daryeelka ilmaha iyo adeegyada waafaqsan Sharciga Adeegyada Daryeelka Waxbarashada iyo Sharciga Caawinta Qoyska.

Waa muhiim in aad fahanto in Sharciga Qaranka iyo Sharciga Caawinta Qoyska ay maamulaan Daryeelka Maalintii ee Qoyska iyo kaalmada la la siiyo qoysaska u qalma ay ka heli karaan dhinaca Dowlada Oostareeliya.

Waxaa jiro dhowr shuruudood oo muhiim ah ee ah inaad buuxiso si loo hubiyo in adiga adeegaaga Daryeelka Maalinta Qoyska uusan jabineynin Sharciga Caawinta Qoyska ama Sharciga iyo Xeerarka Adeegyada Daryeelka iyo Waxbarashada. Adeegaagga waa in uu kugu caawiyaa in aad fahanto sharciyadan.

Waa in aad leedahay caymis

Waa in aad leedahay ugu yaraan $10 milyan caymiska mas'uuliyada bulshada ah ee loogu talogalay deegaanka Daryeelka Maalintii ee Qoyskaaga oona lagu hubsado in siyaasadda caymiskaaga ay tahay mid cusub.

Waa in aad ahaataa qof ku haboon

Ka maclin ahaan waa in aad ku haboonaataa in aad bixisid daryeelka carruurta. Waxaad u baahantahay in aad leedahay baaritaan booliis hadda ah iyo Baaritaan Lagula Shaqaynayo Carruurta ama wax u dhigma. Adeegaagga waa in uu awoodo in uu bixiyo diiwaan qoran oo baaritaanadan ah, wakhti kasta haddii laga codsado dhinaca Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka.

Arimaha ku lug leh khiyaano, musuq-maasuq ama dayicid waxay saamayn karaan haddii aad tahay qof ku habboon ama haddii aadan ahayn. Xeerarka Qaranka sidoo kale waxaa lagu dabakhayaa dadka kale ee waaweyn kuwaas oo adiga kula nool tusaale ahaan adiga waxaad u baahantahay in aad u sheegtid adeeg bixiyahaaga haddii qof wayn kula soo dego. Adeeg bixiyaha la Oggolaaday waa in uu hubsado in dhammaan dadka waaweyn ee ku nool gurigaaga ay yihiin kuwo caafimaad qaba oo ku habboon in ay carruur la joogaan. Waxaa in aadan carruurta keligooda uga tagin dadka soo booqda.

Waxaad ubaahantahay inaad leedahay shahaadooyin

Waxaad u baahantahay in aad haysatid ama aad ka shaqeyneysid in aad qaadatid shahaadooyin – Shahaadada III ee Waxbarashada iyo Adeegyada Daryeelka. Shahaadadan waxaa ay kugu caawineysaa sare u qaadidda xirfadahaaga ee daryeel bixinta iyo waxbarashada loogu talogalay carruurta yar. Waxaad ka baran kartaa Shahaadadan III kulliyada TAFE ama hay'ada tababarka ee diiwaangashan. Waxaad sidoo kale u baahantahay shahaadooyinka gargaarka koowaad oo ay ku jiraan shahaadada CPR iyo tababarka maareynta degdegga ah ee neefta iyo xasaasiyada).

Waa in aad ku diiwaan gashantahay ama ku qoran tahay PRODA

Sidoo kale waxaa khasab kugu ah in aad ku qoran tahay koontada xisaabta Gelida Lambarka ah ee Adeeg bixiyaha (PRODA), oona laguugu xiro adeeg bixiye si loogu bixiyo Kabka Daryeelka Ilmaha ee loogu talogalay daryeelka aad siisid qoyskaaga.

Ka-dib marka aad isku qortid PRODA oo aadna xaqiijiso shakhsiyadaada, waxaad heli doontaa lambarka Maamulka Diiwaan gelinta (RA). Waxaa khasab kugu ah in aad siisid lambarkan bixiyaha Daryeelka Maalintii Qoyskaaga maadaama ay u baahan karaan in ay kugu xiraan adeegooda Daryeelka Maalintii Qoyska ee ah Nidaamka Kabka Daryeelka Ilmaha. Waxaa khasab kugu ah in aad oggaatid in lacag bixinada Kabka Daryeelka Ilmaha aan lagu bixin karin daryeelka la bixiyay halkaas oo macalinka uusan xaqiijinin shakhsiyadooda ee ah PRODA oona bixiyaan lambarkooda RA ee iska leh bixiyaha Daryeelka Maalintii Qoyska.

Faah-faahinada ku saabsan sida loo buuxiyo diiwaan gelintaada waxaa laga helayaa boggaan internetka ah **www.education.gov.au/becoming-child-care-subsidy-approved-child-care-service**.

Waa in aad bixisaa daryeel tayaysan

Ka macalin ahaan, waa inaad buuxisaa Heerka Tayada Qaranka ee Waxbarashada iyo Adeegyada Daryeelka aadna isticmaashid Qaab-dhismeedka Waxbarashada Sannadaha Hore ee la ansixiyay iyo Qaab-dhismeedka Daryeelka Da'da Dugsiga si loo taageero daryeel tayeysan iyo waaya aragnimo waxbarasho ee jawi ammaan ah.

Waxaad kaliya oo laguu ogolyahay inaad daryeeshid tiro kooban oo carruur ah

Waxaa kaliya oo aad daryeeli kartaa illaa todobba carruur, oo ay ku jiraan qaraabada waqtigiiba (kuwaas oo ay da'doodu tahay 13 sanno ama ka yar oona dhiganin dugsiga sare) oo aanan ku jirin wax ka badan afar carruurta da'da dugsiga barbaarinta ama ka hooseeyo.

Waxaa khasab kugu ah in aad hubsato in wax kayar 50% oo ah carruurta aad daryeelka siisid labadii todobaadba ay yihiin kuwo adiga xiriir kula leh.

Adeegaaga waa inuu dajiyaa qidmooyinka

Adeegaaga ayaa masuul ka ah dajinta qidmooyinka iyo dajinta xeerarka ku dalacitaanka qidmooyinka.

Lacag ayaa lagugu siiya adeega, qoysaskana ayaa bixiyo adeega daryeelka. Lacag bixintaada waa in lagu dajiyaa heshiis qoran ee u dhaxeeyo adiga iyo adeegaada.

Waa muhiim in la fahmo in qoysaska ay lacagta ku bixiyaan adeega oo ma ahan adiga gaar ahaan. Macalimiin badan waxay ka aruuriyaan lacagaha qoysaska, si kastaba, marka ay sameynayaan sidaas waxay ku aruurinayaan matalaada adeega.

Waloow adeegga kaa dhigi karo in aad u haysatid midaan sida qayb ka mid ah lacag bixintaada ee laga helo adeegga.

Adeegaaga waxaa looga baahanyahay inuu bayaano iyo rasiidyo bixiyo

Adeegaagga waxaa looga baahan yahay in uu siiyo qoysaska bayaan hal jeer labadii todobaad kasta. Bayaankan wuxuu u sheegaya iyaga daryeelka la bixiyay, lacagaha laga rabo iyo Kaalmada Daryeelka Ilmaha ama Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee Dheeraadka ah ee la bixiyay.

Ka macalin ahaan, waxaa dhaqan wanaagsan ah in la bixiyo rasiidyada mar walboo aad qoysaska ka heshid lacag. Waxaad u baahaneysaa inaad bixisid diiwaanka rasiidyada ee adeegaaga. Rasiidyada waa inay si cad u tusaan in qidmooyinka la siiyay adeegaaga.

Qoysaska waxaa ay sameeyaan ka qayb-qaadashowada jir ah oo ay ka qayb-qaataan lacagaha daryeelka ilmahooda ayaga oo bixinaya baaqiga u dhaxeeya lacagta la iska rabo iyo tirada lacagta Kaalmada Daryeelka Ilmaha. Si aad ugu qalantid Kaalmada Daryeelka Ilmaha, qoysaska waxaa khasab ku ah in ay mas'uul ka noqdaan bixinta lacagaha daryeelka ilmaha ee hoos imaanaysa U-hoggaansamidda Qaban qaabada Qoran ee lala sameeyo bixiyaha daryeelka ilmaha.

Waxaad u baahantahay in aad ilaaliso diiwaanada qoyska

Dhammaan macluumaadka ku saabsan qoysaska waa in aan loo siideynin dadka kale marka laga reebo halka loo baahanyahay sida waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska. Ciqaab ayaa laga muteysan isticmaal aan la sharciyeynin ama siideyn.

Waa in aad bixisaa wargelinta ka qeybgalka oo sax ah iyo diiwaanada ee adeega

Ka macalin ahaan, waa inaad sheegtaa wargelinada ka qeybgalka ee adeegaaga oo sax ah ee ku saabsan daryeelka aad dhiibto isbuuc walba. Tani waxay la micna tahay kaliya wargelinta ka qeybgalka ee kulamada ee canuga dhabtii uu ka qeybgalay. Waad soo wargelin kartaa maqnaanshaha, laakin waa haddii canuga ay ahayd in uu joogo daryeelka iyo kaliya haddii qoyska lagu qoray lacagta daryeelkaas.

Haddii aad soo dirtid warbixinno ka qayb-qaadasho khalad ah oo ku saabsan adeegaagga midaan waxaa ka dhallan karta deymo ku dhaca qoysaskaaga ama adeegaagga midaas oo u baahan in lagu sheego ama ceymiyo taariikh dambe.

Waa maxay xaquuqaheyga ka macalin ahaan?

Adeegaaaga Daryeelka Maalinta Qoyska waa inuu la yimaado dhaqamo wax ku ool ah oo anshax leh oo kugu caawinayo macalin ahaan.

Dhaqamada wax ku oolka iyo anshaxa waxaa ku jiro siinta macalimiinta macluumaad waqtiyeysan iyo waxbarasho joogta ah, dhiirogelinta wadashaqeynta iyo iskaashiga, iyo hormarinta iyo raacida heerarka xirfadlayaasha iyo xeerarka anshaxa.

Qodobada Muhiimka ah

- Dowlada waxay siisaa Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyo Kaalmada Daryeelka Ilmaha Dheeraadka ah qoysaska u qalmo iyada oo la isticmaalayo Daryeelka Maalintii ee Qoyska sida waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska.
- Adeegga wuxuu leeyahay waajibaadyo sharci ah sida waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska iyo Sharciga Qaranka.
- Waxaad u baahantahay shahaadooyin rasmi ah si aad u noqoto macalin waana inaad bixisaa daryeel tayo leh iyo waaya aragnimo waxbarasho ee jawi ammaan ah adiga oo isticmaalayo Qaab-dhismeedyada Waxbarashada La ansaxiyay.
- Waxaa khasab kugu ah in aad ku qorantahay koontada xisaabta Gelida Lambarka ah ee Adeeg-bixiyaha (PRODA), oona laguugu xiro adeeg-bixiye si loogu bixiyo Kabka Daryeelka Ilmaha ee loogu talogalay daryeelka aad siisid qoyskaaga.
- Waxaa kaliya oo aad daryeeli kartaa illaa todobba carruur waqtigiiba (da'doodu tahay 13 sanno ama kayar oo aan dhiganin dugsiga sare), oo aanan ku jirin wax ka badan afar carruur ee da'da dugsiga barbaarinta ama ka hooseeyo iyo wax kayar 50% oo ah carruurta adiga xiriirka kula leh.
- Adeegaaga Daryeelka Maalinta Qoyska ayaa dajiyo qidmooyinka. Waxaad ka aruurin kartaa lacag qoysaska laakin tani waa lacag bixinta adeega – inkastoo adeega ku ogolaan karo inaad iska haysatid sida qeyb ka ah lacagta aad ka qaadaneysid adeega.
- Waa dhaqan wanaagsan in aad siisid qoysaska rasiidyo sax ah oo si cad u muujiyaa qidmooyinka loo bixiyay adeega.
- Qaabeynta lacagta aad qaadaneysid waa in lagu dajiyaa heshiis qoran ee u dhaxeeyo adiga iyo adeegaaga.
- Adeegaaga waa in uu siiyaa bayaano iyo rasiidyo qoysaska halmar labadii todobaad kasta.
- Waa inaad bixisaa wargelin ku saabsan ka qeybgalka oo saxan ee carruurta adeegaaga. Waa inaad bixisaa diiwaanada ka qeybgalka ee saxiixan oo canug walba ee ka qeybgalayo kulanka daryeelka, oo ay ku jiraan diiwaanada ka maqnaansho walba oo daryeelka.
- Haddii aadbixisud diiwaanada ka qeybgalka oo been ah ee adeega, waxaad jabineysaa sharciga.



This brochure has been produced in 11 languages: Amharic, Arabic, Assyrian, Dari, Dinka, French, Hazaragi, Nuer, Somali, Sudanese, and Swahili. To find the brochure in your language please go to **www.fdcsupport.org.au**

La soo ogeysiinayo

Ka macalin ahaan, waa inaad heshaa warbixin saxan oo dhammeystiran, gaar ahaan ku saabsan arimaha saameynayo jawigaaga shaqo. Adeegaaga waa inuu lahaadaa xeerar iyo nidaamyo cad ee loogu hubinayo filashooyinka caadiga ah ee ku saabsan sida waxyaabaha loogu sameeyo adeega sarena loogu qaado dhaqan joogteysan.

Waxbarashada joogtada ah

Cusbooneysiinta iyo joogteynta aqoonta macalimiinta waa masuuliyad wadajir ah ee saaran macalimiinta, xiriiriyayaasha, iyo adeega daryeelka canuga. Waa in lagu siiyaa fursado joogta ah ee aad uga qeybgalaysid kobcinta xirfaddaada ee kugu caawinayo inaad noqotid macalin wanaagsan iyo si loo hubiyo inaad fahamsantahay sharciyada iyo xeerarka ah inaad raacdid.

Heerarka xirfada iyo xeerarka anshaxa

Adeegaaga, macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha waa inay isticmaalaan dhaqamada anshaxa iyo heerarka xirfadlaha si loo jaheeyo go'aan gaarista iyo dhaqanka adeegooda. Xeerka anshaxa waa xeerka dabeecada ee tilmaamaa caadooyinka adeegaaga Daryeelka Maalinta Qoyska oona bixiyaa filashooyin cad ee ku saabsan masuuliyadaada la xiriirto midba midka kale iyo qoysaska iyo carruurta isticmaaleyso adeega.

Adeegaaaga Daryeelka Maalinta Qoyska waa inuu lahaadaa Xeerka Anshaxa Badbaadada Canuga si loo saaro shakiga ku saabsan dabeecadaha ku haboon ama aan ku habooneyn carruurta adeegaaga.

Haddii sida macalinka Daryeelka Maalintii Qoyska ahaan aad la kulmaysid dhibaatooyin la xiriira heerarka xirfadeed ama aad aaminsantahay in lacagta si khalad ah lagaaga siiyay dhinaca adeega Daryeelka Maalintii ee Qoyska, midaan waa in aad kala hadashid adeegaagga.

KA OGOOW WAX BADAN

Buug-yaraha Bixiyaha Daryeelka Ilmaha waa xog aasaasi ah oo loogu talogalay bixiyayaasha waxbarashada xilliga hore iyo daryeelka ilmaha waxaana laga heli karaa boggan internetka ah:
www.education.gov.au/child-care-provider-handbook-0

Ka ogoow wax badan adiga oo gala bogga internetka soo socda:

- **www.education.gov.au/compliance**
- **www.education.gov.au/child-care-providers**
- **www.fdcsupport.org.au**
- **www.fdca.com.au**
- **www.acecqa.gov.au**

Ama adiga oo gala bogga internetka adeega Daryeelka Maalinta Qoyskaaga ama macluumaad kale oo ay ku siiyeen sida buuggaaga yar ama buuggaag gacmeedka tilmaamaha

Nofeembar 2018

Amharic በራስዎ ቋንቋ በራሪ ወረቀት ለማግኘት **www.fdcsupport.org.au**. ድረ ገጽን ይመልከቱ

Arabic لإيجاد الكتيب بلغتك، يُرجى تصفح موقع الويب **www.fdcsupport.org.au**.

Assyrian ܠܡܫܟܚܘܬܐ ܕܟܬܒܐ ܒܠܫܢܐ ܕܝܠܘܟܘܢ، ܒܥܝܐ ܣܪܘܩܘܢ ܠܐܬܪܐ **www.fdcsupport.org.au**.

Dari برای دریافت جزوه به زبان خودتان، لطفاً به ویبسایت **www.fdcsupport.org.au** مراجعه کنید.

Dinka Të kɔɔr yin kitap në thoŋdu kitam tɔ̈ wëlthin ke yin lɔ në **www.fdcsupport.org.au**.

French Pour trouver la brochure dans votre langue, veuillez visiter le site **www.fdcsupport.org.au**.

Nuer Kɛ ɣöö bi ŋäc jiek rɛy warɛgakä/ kiɛ majalɛ kɛ thuok du, göa ɛ ɛn ɣöö bi wä kä **www.fdcsupport.org.au**.

Hazaragi برای دریافت این بروشور به زبان خود تان، لطفاً به ویب سایت **www.fdcsupport.org.au** مراجعه کنید.

Somali Si aad ugu heshid buugyaraha luuqadaada fadlan booqo **www.fdcsupport.org.au**.

Sudanese لإيجاد الكتيب بلغتك، الرجاء تصفح موقع **www.fdcsupport.org.au**.

Swahili Ili kupata brosha hiyo kwa lugha yako tafadhali tembelea tovuti **www.fdcsupport.org.au**.

Australian Government
Department of Education and Training

NSW FAMILY DAY CARE ASSOCIATION INC. since 1976